Warbixin ku saabsan shaqaaleysiinta iyo shaqo ku tijaabinta soogalootiga iyo dadka ku hadla luuqadaha qalaad

Shaqaaleysiinta shaqo ku tijaabinta degmada

Habka shaqo ku jitaabinta degmada waxa ay bilaabmaysaa 1.3.2021 waxa ayna ku egtahay ilaa 30.6.2023. Habkan shaqo ku tijaabinta waxa ay qayb katahay habka uu qofka shaqo la`aanta ah ee shaqo codsadaha ah uu oogu wareegilahaa macmiilna ooga noqon lahaa degmadiisa. Shaqo ku tijaabinta degmada waxaa hirgelinaya xafiiska shaqada shaqaalaha iyo adeegyada ganacsi waxa ayna adeegaan oogu deeqayaan dadka macmiilka ka ah.

Dadka soogalootiga ah inta ay kujiraan xilliga qorshaynta laqabsashada waddankan iyo dadka reer Tampere ee ku hadla luuqadaha ajaanibta u adeegidooda waxaa hirgelinaya xafiiska adeegyada caalamiga ee khibradlayaasha iyo latalinta. Marka qofka soogalootiga ah uu u dhammaado xilliga qorshaynta laqabsashada waddanka waxa uu ku wareegaya adeegyada degmada ay bixiso Sidoo kale dadka kale ee ku hadla luuqadaha ajaanibta iyagana waxa ay ku wareegayaan adeegga degmadu ay bixiso. Goobta adeegyada luuqadaha kaladuwan ee Maino waxa ay u adeegeysaa dhammaan soogalootiga deggan gobolka Pirkanmaa ee u baahan latalin ama hagis.

Haddii aad ka tirsantahay ood macmiil katahay habkan ku shaqaaleysiinta shaqo barashada waxaad warbixin u heleysaa si shaqsiyan ah. Macmiilka habkan lagu tijaabinayo si toos ah ayuu oogu wareegaya, arrintan darteed uma baahna in wuu si qaas ah u wargeliyo xafiiska shaqada ama kan degmada ee howshaan wado.

Inta lagu jiro tijaabadan sidii caadiga aheyd ayuu shaqo codsadaha isaga diiwaan gelinyaa xafiiska shaqada. Waxaad isticmaali kartaa adeegga kuu qaaska ah ee beejka xafiiska shaqada. Xafiiska shaqada ayaa ku hagaya ku tijaabinta macmiil ka noqoshada degmada. Macmiilnimadu waxa ay soconeysaa in ta ay kuusocoto shaqo ku tijaabinta.

Isdiiwaan gelinta shaqo codsashada beejkaaga xafiiska shaqada waa

Macmiilnimadaada dhaqaalaynta shaqo ku tijaabinta

Waxaad heleysaa khibradle kuu qaas ah oo kaa caawinaya dhammaan waxyaalaha ku saabsan sidii aad shaqo u heli lahayd. Tusaale ahaan khibradlaha waxa uu kaala talinayaa adeegyada, warbixinada qoraalka ah iyo su`aalaha ku saabsan go`aamada kasoo baxa xafiisyada dowladda.

Waxyaalaha ah in uu macmiilka xusuusto

Haddii aad xafiiska shaqada kula heshiisay arrimo ku saabsan shaqo codsasho, ballamo, adeegyo ama wax qabad waa in aad ku sameeyaa xilligii laguu qabtay. Sidan haddaad sameyso kaama go`eyso lacagta shaqo la`aanta.

- Soo wargeli xaalad walba oo isbeddel kugu yimaada, beejkaaga xafiiska shaqada, tusaale ahaan haddii aad shaqo ama waxbarasho bilawdo ama haddii macluumaad kaaga is baddalo.
- Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama aad su`aal qabtid, soo wac taleefanka guud ee adeegyada macmiilka, tal. 0295 025 500 (isniinta-jimcaha saacadda 9.00-16.15) ama beejkaaga xafiiska shaqada ku soo sheeg in lagula soo xiriiro.
- Haddii aad bilaabeyso wax qabad cusub, dhammaan foomamka ama warqadaha la xiriira waa in inta aadan bilaabin kahor u keentaa xafiiska shaqo ku tijaabinta. degmadaada

Shaqo ku tijaabinta dadka soogalootiga

Magaalada Tampere dadka soogalootiga ah xarunta dhexe ee khibradlayaasha (OSKE) waxa ay u ageegtaa dhammaan dadka ku hadla luuqadaha ajaanibta ee shaqo codsadaha ah, dhammaan macaamiisha ajaanibta ah ee kujira xilliga qorshaynta laqabsashada waddankan ee deggan gobolka Pirkanmaa. Waxaad heleysaa caawimaad ku saabsan arrimaha shaqo helista iyo waxbarashada.

Xarunta (OSKE) waxaad ka heleysaa adeegyadan:

Qofka adiga ku qaabilsan (Ka qeyb qaadasho - Dhiiragelin - firfircoonaan)

• Qofka ku qaabilsan waxa uu kuu caawinaya si shaqsiyan ah iyadoo loo marayo adeegyada ku hagista Shaqaaleysiinta iyo waxbarashada dadka soogalootiga ah.

• Adeegyadan waxaa u yaalo xeer ama sharciyo ah in lamaro marka la sameynayo qorshaynta laqabsashada waddanka: qiyaasid ah in adeeggan loobaahan yahay iyo waraysi lagu waraysanayo, qorshaynta laqabsashada waddanka, habka go`aan ka gaarista (mushaarka iyo wixii la mid ah) iyo waxbarashada / ku hagista adeegyada u suuraggeliya shaqo helista.

• Qofka ku qaabilsan waxa uu la xaajoonayaa khibradlayaasha kale sidii lagugu qorshayn lahaa waxbarashada kugu haboon, haddii loobaahdana waxa uu la xaajoonayaa magaaladaada shaqaalaha sooshalka sidii laguu caawin lahaa, oo lagugu hagi lahaa caawimadaha kugu haboon.

• Qofka ku qaabilsan waxa uu dadka ay u dhammaatay xilligii qorshaynta laqabsashada waddanka waxa uu u sameeyaa qorshe ah habkii uu si firfircoon shaqo ku heli lahaa, waxa uuna ku hagaa adeegyada shaqo iyo waxbarasho helista.

Adeegga kuu raadinaya shaqada

• Isuduwaha ganacsiga waxa uu macmiilka ku caawinaya sidii ay suuraggal u noqon lahayd in uu shaqo helo, waxaa kaloo uu falanqayn ku samaynaya goobaha ganacsi hadba sida loogu baahan yahay.

• Isuduwaha ganacsiga waxa uu si dadaal leh oola xariiraa kambaniyada, iyo ganacsatada degaanka. Waxa latiigsanaya waa in dadka soogalootiga ah loogu deeqo shaqooyin kaladuwan (shaqo ku tijaabin, mushaar ku kucaawinta, ku kobcin shaqo iwm.)

• Isuduwaha ganacsiga waxa uu ganacsatada ku caawinaya, habka oogu wanaagsan ee keenikara xal oo ah sidii qofka soogalootiga ah loo shaqaalaysiin lahaa.

• Kuwa bartay ilaa heer jaamacadeed iyo kuwa sida dhaqsaha ah horumar ugaaraya waxaa loogu talagalay adeeggan Career-Boots.

Xoojinta sahminta aqoonta

• Sahminta aqoonta waxay qaadaneysaa muddo toddobaad ah (shan maalmood) waxaana loo hirgalinaayaa qaab fogaan ah ama goobta waxbarashada loo imaanaayo qaab kala sooc ah.

• Waqtiga sahminta aqoontaada waxaa ku jira daraasad shaqsiyeed iyo hagitaan shaqo, qiimeyn heerka aqoonta luuqada finnishka iyo u diyaar ahaanta waxbarashada, sido kale aqoonsiga aqoonta xirfadeed ee aad leedahay. Macaamiilka waxaa lala sameynaa mudadaas sidii loo wadi lahaa qorshihiisa.

• Xog ururin macallin gaar ah ayaa la heli karaa haddii loo baahdo.

• Sahminta aqoonta ayaa ku habboon kuwa soo dhamaystay waxbarashada la-qabsashada wadanka ama dadka muddo dheer ku noolaa dalka, una baahan inay horumariyaan xirfadahooda si ay shaqo u helaan.

Kala xariir:

Xarunta dhexe ee khibradlayaasha caalamiga

Rautatienkatu 10, dabaqa 5 aad

www.tampere.fi/oske

osaamiskeskus@tampere.fi

tal. 041 730 1407

Adeegga luuqadaha kaladuwan ee Mainio waxa ay adeegyo kaladuwan siineysaa dhammaan soogalootiga deggan gobolka Pirkanmaa Adeegga iyo latalinta ay kusiinayso Mainio saameyn kuma laha asal raacaaga, ama sababta aad waddankan u timid.

Xarunta Mainio waxaad ka heleysaa adeegyadan:

Adeegyada luuqadaha kala duwan ee Mainio

• Waxa ay kugu hageysaa oo kugula talineysaa luuqaddaada iyo weliba 16 luqaddood, waxayna kaala talineysaa arrimaha dhanka xafiisyada dowladda, iyo arrimaha kusaabsan habka soo gelitaanka waddankan.

Latalinta ay kusiinayso waxaa kamid ah, laqabsashada waddankan, caafimaadka, hiwaayadaha, waxbarashada, shaqo helista, iyo su`aalaha ku saabsan degganaanshaha waddankan.

• Waxaa lagu hagaya lagulana talinayaa goobta saxda ah ee baahida macmiilku tahay, marka macmiilku haysto dhibaato xagga nolosha ah, ay ku adkaato sidii uu xog ooga heli lahaa adeegyada guud ee bulshada loogu tala galay.

Adeegga luqaddaada waxaa suuraggal ah in aad ku heshid goobta adoo jooga ama adeegga fogaata sida (taleefanka,barnaamijyada latalinta, ama adoo yimid goobta).

• Adeegga latalinta waxaa kaloo kamid ah falaqaynta arrimahaaga dadka ka baxsan arrimaha qorshaynta laqabsashada waddankan, tusaale ahaa ardayda iyo waalidka guriga carruurta ku haya.

Kala xariir:

Adeegyada luuqadaha kala duwan ee Mainio

Rautatienkatu 10, dabaqa 1 aad

www.tampere.fi/mainio

mainio@tampere.fi

Borogaramka Neuvoo-app (waxaad si bilaash ah ooga soodejisan kartaa Play- iyo App-storka)

FAQ

Yaan wici karaa, yaa weeyaan shaqaalaha qaabilsan?

Adiga waxaa adeegga ku siinayo degmadaada, ama xarunta dhexe ee khibradlayaasha caalamiga dadka soogalootiga ah ee Tampere taleefanka 040 730 1407.

Ma deggani Tampere. Maka heli karaa caawimaad habka shaqo codsashada ah xarunta dhexe ee khibradlayaasha caalamiga?

Haddii degaankaagu yahay gobolka Pirkanmaa aadna ka tirsantahay goobta shaqo ku tijaabinta uuna weli kuu harsan tahay xilligii qorshaynta laqabsashada waddankan, haa waxaad xarunta dhexe ee khibradlayaasha caalamiga ka heleysaa caawimaad ah sidii aad shaqo ku heli lahayd. Haddii ay kuu dhammaatay qorshaynta laqabsashada waddankan, waxaad caawimaad ka heleysaa deegaanka aad deggan tahay.

Luqadda finishka si wanaagsan uma aqaan. Yaa i caawinaya?

Waxaa ku caawin kara xarunta dhexe ee khibradlayaasha caalamiga qofka adiga ku qaabilsan, isuduwaha ganacsiga ama goobta caawimaada luuqadaha lakaduwan ee Mainio.

Xarunta dhexe ee khibradlayaasha caalamiga OSKE

Adeegyada luuqadaha kala duwan ee Mainio